OREGON
DEPARTMENT OF
EDUCATION
*Oregon achieves . . . together!*

# Xoriyadda Akhriska (Xeerka Aqalka Sare ee tirsigiisu yahay 1098): Su'aalaha Inta badan la Weydiiyo

## Liiska Mawduucyada


1. Maxay qabataa Qaybta 2-aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)? .......... 2
2. Waa kuma qofka mas'uulka ka ah xulashada ama haynta agabyada maktabadda? .......... 2
3. Waa maxay astaamaha dadka la ilaaliyo ee Oregon? .......... 2
4. Waa maxay "agabyada maktabada"? .......... 2
5. Waa maxay "maktabadaha fasalka" iyo "maktabadaha dugsiga"? .......... 2
6. Sharcigu ma khuseeyaa uruurinta maktabadda dugsiyada dadweynaha ee charter-ka ah? .......... 2
7. Sharcigu ma khuseeyaa uruurinta maktabada ee ururada bulshada ee la shaqeeya dugsiyada dadweynaha? .......... 3
8. Goorma ayaa la saari karaa agabka maktabadda as part of a reconsideration process? .......... 3
9. Waa maxay guddiga dib u-eegista, yaase qayb ka noqon kara? .......... 3
10. Xubin ka tirsan guddiga dugsiga ma codsan karaa in la saaro agabyada maktabadda marka aan loo adeegsaneyn shaqadooda rasmiga ah? .......... 3
11. Goorma ayaa la saari karaa agabka maktabadda? .......... 3
12. Sidee guddiga dib u-eegista u bixin karaa sharraxaad qoraal ah oo dadweyne oo ku saabsan saarista agabyada maktabadda? .......... 3
13. Ma jiraan sharciyo bixiya ilaalin la mid ah Qaybta 2 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)? .......... 4
14. Ka waran haddii agabyada maktabadda la doorto, la hayo, ama lagu saaro qaab takoor ah? .......... 4
15. Goorma ayay Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) aqbali doontaa racfaan? .......... 4
16. Ujeeddooyinka ODE ay ku aqbasho racfaanka marka la eego, sidee qofku ugu gudbin karaa cabasho ku saabsan takooris? .......... 5
17. Kadib marka la aqbalo racfaan, maxay noqon doontaa baaxada baaritaanka ODE? .......... 5
18. Ka warran haddii ODE ay ogaato in dugsi dadweyne uu jebiyay sharciga? .......... 5
19. Ka waran haddii dugsi dadweyne uu ku guuldareysto inuu buuxiyo amar ODE si loo saxo jebinta sharciga? .......... 6
20. Maxay qabataa Qaybta 6 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)? .......... 6
21. Maxay qabataa Qaybta 7 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)? .......... 6
22. Ka waran haddii guddiga dugsiga dugsiyada degmada ama qof kale uu ku xadgudbo Qaybta 6 ama 7 ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)? .......... 7
23. Sharcigu ma ogol yahay iibsashada agabyada maktabadda, buugaagta waxbarashada, agabka waxbarashada, ama agabyada barnaamijka ee ujeeddooyin diimeed loo adeegsado? .......... 7
24. Sidee sharcigu u ilaaliyaa diinta si loo dhawro koox la ilaaliyo? .......... 7

## 1. Maxay qabataa Qaybta 2-aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)?

Sida ku cad [Qaybta 2 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)](), oo lagu qeexay Xeerarka Dib loo eegay ee Oregon (Oregon Revised Statutes, ORS 337.277):

- Qof kasta oo mas'uul ka ah xulashada ama haysashada agabka maktabada ma mamnuuci karo xulashada ama haynta agabka maktabadda iyadoo lagu saleynayo in agabku ay ku jiraan aragti, daraasad ama sheeko, ama ay abuureen qof ama koox ka tirsan nooc dad oo la ilaaliyo; iyo
- Qof kasta oo aan mas'uul ka ahayn xulashada agabyada maktabada ma saari karo agabka, marka laga reebo qayb ka mid ah geedi-socodka dib u-eegista (fiiri Su'aalaha Inta badan La Weydiiyo (FAQ) #8).

## 2. Waa kuma qofka mas'uulka ka ah xulashada ama haynta agabyada maktabadda?

Qofka mas'uulka ka ah xulashada ama haynta agabyada maktabada waxaa ka mid ah *qof kasta* oo awood leh inuu gaaro go'aano ku saabsan agabyada maktabada ee dugsiyada dadwaynaha ee la dooranaayo ama la haynaayo. Tani waxaa ku jiri kara macalimiin shati haysta oo leh taageerada warbaahinta maktabada, maamulayaal, macallimiinta fasalka, iyo shaqaale gaar ah oo mas'uul ka ah fasalka ama maktabadda dugsiga.

## 3. Waa maxay astaamaha dadka la ilaaliyo ee Oregon?

Sida uu qabo sharciga Oregon, waxaa jira toban astaan oo kamid ah astaamaha dadka ee la ilaaliyo. Astaamaha dadka ee la ilaaliyo waa jinsiyada, midabka, asalka qaranka, jinsiga, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga, shakhsiyaadka naafada ah, diinta, xaaladda guurka, iyo da'da.

## 4. Waa maxay "agabyada maktabada"?

Agabyada maktabadu waa agab waxbarasho oo khiyaali ah ama aan khayaali ahayn ama agab kale oo lagu hayo fasalka ama maktabadda dugsiga oo lagu heli karo qaab daabacan ama elektaroonig ah. Agabyada maktabadda waxaa ka mid ah agabka fasalka iyo maktabadda dugsiga oo loo hayo ujeeddada ah in agabka akhriska ee madaxbannaan loo siiyo ardayda, iyo agabka dheeraadka ah ee loo hayo ujeeddada lagu kabayo agabyada waxbarashada asaasiga ah. Agabyada maktabadu *maaha* agab waxbarasho oo asaasi ah oo ay qaataan guddiga dugsiga degmada, Guddiga Waxbarashada Gobolka, ama guddi ama maamule mas'uul ka ah qaadashada buugaagta waxbarashada iyo agabyada waxbarashada. Ujeedada agabyada maktabadu way kala duwanaan kartaa waxaana kamid ah horumarinta iyo fidinta waxbarashada ilaa dhiirigelinta akhriska.

## 5. Waa maxay "maktabadaha fasalka" iyo "maktabadaha dugsiga"?

Guud ahaan, maktabadaha fasalka iyo maktabadaha dugsigu waxaa kamid ah meel *kasta* oo guud oo ku taala dugsiga dadweynaha oo agabyada maktabadda ay ka heli karaab ardayda, oo ay ku jiraan fasallo kelida ah, meelaha guud ee ay adeegsan karaan laba fasal ama ka badan, goobaha dhexe, iyo meelaha guud ee ay geli karaan hal ama in ka badan ardayda fasalka. Maktabadaha dugsiga waxaa sidoo kale ku jira agabyada maktabada oo laga heli karo qayb ka mid ah barnaamijka waxbarashada khadka tooska ah.

## 6. Sharcigu ma khuseeyaa uruurinta maktabadda dugsiyada dadweynaha ee charter-ka ah?

Haa. Sharcigu wuxuu khuseeyaa uruurinta maktabada ee dugsi kasta oo dadweyne oo Oregon ku yaala, oo ay ku jiraan uruurinta maktabadda ee dugsiyada dadweynaha ee charter-ka ah.

### 7. Sharcigu ma khuseeyaa uruurinta maktabada ee ururada bulshada ee la shaqeeya dugsiyada dadweynaha?

Maya. Sharcigu wuxuu khuseeyaa oo keliya uruurinta maktabada ee dugsiyada dadweynaha ee Oregon.

### 8. Goorma ayaa la saari karaa agabka maktabadda as part of a reconsideration process?

Agabyada maktabada waxaa ka qaadi kara qof aan mas'uul ka ahayn xulashada ama haynta agabyada maktabada marka la buuxiyo shuruudaha soo socda oo keliya:

- Codsi ayaa la sameeyay si looga saaro;
- Qofka codsiga sameynaya waa waalid ama mas'uul ardayga dhigta dugsiga ama shaqaale ka tirsan dugsiga;
- Codsigu waa mid rasmi ah oo qoran;
- Codsiga waxaa dib u eegaya guddi dib u eegis oo ka socda dugsiga dadweynaha ama degmo dugsiyeedka;
- Agabyadu waxay ku sii jiri karaan wareegga inta lagu jiro nidaamka dib u-eegista;
- Saaristu ma dhacayso sababtoo ah agabyada waxay ka kooban yihiin aragti, daraasad ama sheeko ku saabsan, ama ay abuureen, qof ama koox ka tirsan nooc astaan la ilaaliyo; iyo
- Guddiga dib u-eegista ayaa bixinaya sharraxaad qoraal ah oo caam ah oo loogu talagalay saarista.

### 9. Waa maxay guddiga dib u-eegista, yaase qayb ka noqon kara?

Guddiga dib u eegista waa guddi uu sameeyay dugsi dadweyne ama degmo dugsiyeed si ay u go'aamiyaan tallaabada la qaadayo marka maktabada iyo agabyada kale ee waxbarashada la horkeeno: in la hayo, la xaddido, ama laga saaro agabka la isweydiinayo. Dugsiga dadweynaha ama degmo dugsiyeedku waa inay lahaataa hab lagu abuuro guddi dib u eegis, laakiin habkaas, oo ay ku jiraan cidda ku jiri karta guddiga dib u-eegista, waxaa u xilsaaran guddiga dugsiga ee deegaanka ama hay'adda kale ee maamulka dugsiyada dadweynaha.

### 10. Xubin ka tirsan guddiga dugsiga ma codsan karaa in la saaro agabyada maktabadda marka aan loo adeegsaneyn shaqadooda rasmiga ah?

Haa. Xubin ka tirsan guddiga dugsiga oo sidoo kale ah waalid ama mas'uul arday dhigta dugsiga ama shaqaale ka tirsan dugsiga ayaa codsan kara in laga saaro agabyada maktabada marka aysan la jaanqaadeyn shaqadooda rasmiga ah.

### 11. Goorma ayaa la saari karaa agabka maktabadda?

Agabyada maktabadda waxaa la saari karaa oo keliya *marka* guddi dib u-eegis ah uu bixiyo sharraxaad qoraal ah oo dadweyne oo ku saabsan saarista. Agabyadu waxay ku sii jiri karaan wareegga inta lagu jiro nidaamka dib u eegista;

### 12. Sidee guddiga dib u-eegista u bixin karaa sharraxaad qoraal ah oo dadweyne oo ku saabsan saarista agabyada maktabadda?

Tusaalooyin qaar oo ku saabsan bixinta sharaxaad qoraal ah oo dadweyne waxaa ka mid ah:

- Kusoo dhejinta sharaxaada qayb si fudud loo heli karo oo ka mid ah bogga interneetka ee dugsiga dadweynaha ama degmada dugsiga.
- Sharaxaada lagu dhejiyo goob muuqata oo ku taala dugsiga oo macluumaadka guud ahaan lagu dhejiyo, sida boodhka ogeysiiska.
- Ku dhejinta sharaxaada albaabka ama meel u dhow albaabka laga galo dugsiga ama maktabadda fasalka.
- U dirista iimayl ama ogeysiis qoraal ah waalidiinta iyo mas'uuliyiinta ardayda dhigata dugsiga iyo xubnaha kale ee bulshada.

Ogeysiis qoraal ah oo dadweyne waa inuu ku qoran yahay dhammaan luuqadaha sida caadi ah looga hadlo bulshada dugsiga oo ay heli karaan dadka naafada ah.

## 13. Ma jiraan sharciyo bixiya ilaalin la mid ah Qaybta 2 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)?

Haa. Sida ku cad xeerka kahortaga takoorka ee Oregon, ORS 659.850, qof ka tirsan nooc dadk oo la ilaaliyo laguma takoori karo dugsi dadweyne. Ujeeddooyinka xeerkaas marka la eego, takoorku wuxuu la macno yahay "fal kasta oo si aan macquul ahayn u kala soocaya sida loola dhaqmaayo dadka" qof ka tirsan dabaqadda la ilaaliyo. Diidmada ama ka saarista agabyada maktabadda sababo la xariira inay ka kooban yihiin macluumaad la xiriira nooc dadka la ilaaliyo, ama sababo la xariira inuu qoray qof ka tirsan nooc dadka oo la ilaaliyo, waa fal si aan macquul ahayn u kala soocaya sida dadka loola dhaqmo iyadoo lagu saleynayo inuu ka tirsan yahay fasalka la ilaaliyo.

## 14. Ka waran haddii agabyada maktabadda la doorto, la hayo, ama lagu saaro qaab takoor ah?

Sida ku cad OAR 581-022-2370, qofku wuxuu cabasho u gudbin karaa degmo dugsiyeed iyadoo la raacayo habka cabashada ee caadiga ah ee degmada dugsiyeed haddii:

- Qofku ku nool yahay degmada;
- Qofku yahay waalid ama mas'uulka arday dhigta dugsi ku yaala degmada; ama
- Xitaa haddii qofku uusan deganayn degmada oo uusan ahayn waalid ama mas'uul, qofku wuxuu ku andacoonayaa in isaga ama qof kale la takooray.

Haddii degmadu aysan xallin xadgudubka, qofku wuxuu racfaan u gudbin karaa Waaxda Waxbarashada Oregon (Oregon Department of Education, ODE)). Dugsiyada dadweynaha ee aan ku jirin degmooyinka dugsiyada waxaa laga yaabaa inaysan lahayn nidaam cabasho. ODE wali waxay aqbali doontaa racfaanada xadgudubyada ka dhaca dugsiyadaas xaalado gaar ah (Fiiri Su'aalaha Badanaa La Weydiiyo #15).

## 15. Goorma ayay Waaxda Waxbarashada ee Oregon (ODE) aqbali doontaa racfaan?

Sida ku cad OAR 581-075-0010, ODE waxay aqbali doontaa racfaan mid ka mid ah saddexda xaaladood ee soo socda:

- Dugsi dadweyne ayaa go'aan qoraal ah oo kama dambays ah u soo saaray qof dacwoonaya iyadoo la raacaayo habka dugsigu u wajahayo wax ka qabashada cabashooyinka;

- Dugsi dadweyne ayaa ku guuldareystay inuu xalliyo cabasho 90 maalmood gudahood laga bilaabo marka la helo cabashada, haddii dugsiga iyo dacwooduhu aysan qoraal ahaan ku heshiin muddo kale si loo xalliyo cabashada; ama
- Dugsi dadweyne wuxuu leeyahay hab cabasho oo leh wax ka badan hal tallaabo dugsiguna wuxuu ku guuldareystay inuu qofka cabanaya siiyo jawaab qoraal ah 30 maalmood gudahood laga bilaabo soo gudbinta cabashada tallaabo kasta, haddii aan dugsiga iyo qofka cabanaya ay qoraal ahaan ku heshiin muddo kadib tallaabadaas.

Haddii dugsi dadweyne uusan lahayn nidaam dacwadeed, ODE waxay aqbali doontaa racfaanka mid ka mid ah labada xaaladood ee soo socda:

- Dugsi dadweyne ayaa cabashada qoraal ahaan uga jawaabay; ama
- Dugsi dadweyne ayaa ku guuldareystay inuu xalliyo cabasho 90 maalmood gudahood laga bilaabo marka la helo cabashada, haddii dugsiga iyo dacwooduhu aysan qoraal ahaan ku heshiin muddo kale si loo xalliyo cabashada.

## 16. Ujeeddooyinka ODE ay ku aqbasho racfaanka marka la eego, sidee qofku ugu gudbin karaa cabasho ku saabsan takooris?

Sida ku cad OAR 581-075-0001, cabashada takoorka waxay qaadan kartaa oo lagu soo gudbin karaa qaab warbixin qoraal ah ama mid af ah oo ku saabsan khaladka la sheegay ee loo gudbiyay degmo ama shaqaale degmo, xitaa haddii cabashada aan la gudbin iyadoo la raacayo nidaamka cabashada degmada. Degmadu waxay ku amri kartaa qofka cabanaya, 10 maalmood gudahood marka uu helo warbixinta, inuu soo gudbiyo warbixinta sida waafaqsan nidaamka cabashada degmada. Degmadu waa inay qofka dacwoonaya ku hagtaa qoraal ahaan iyo luuqadda uu qofka dacwoonaya jecel yahay.

## 17. Kadib marka la aqbalo racfaan, maxay noqon doontaa baaxada baaritaanka ODE?

Si wada jir ah, Qaybta 2 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025) iyo ORS 659.850 waxay u oggolaanayaan ODE inay baarto in agabyada maktabadda la diiday ama laga saaray sababo la xariira inay ka kooban yihiin macluumaad la xiriira astaamo dad oo la ilaaliyo, ama sababo la xariira inuu qoray qof ka tirsan nooc dad oo la ilaaliyo. Tan waxaa ka mid ah baaritaanka falalka qofka mas'uulka ka ah xulashada ama haynta agabyada maktabadda, guddiga dib u eegista, ama qof kasta oo kale oo diidaya ama ka saaraya agabyada maktabadda ujeedo takoor ah.

## 18. Ka warran haddii ODE ay ogaato in dugsi dadweyne uu jebiyay sharciga?

Sida ku cad OAR 581-075-0024, ODE waxay amri kartaa dugsi dadweyne inuu qaado tallaabo si loo saxo jebinta. Tallaabada sixitaanka waxaa ka mid noqon kara dib u soo celinta agabyada maktabadda, dib u eegista iyo dib u qorista siyaasadaha ama qawaaniinta, dib u eegista iyo dib u habeynta hababka iyo habraacyada, ka qaybgalka tababar gaar ah, helitaanka caawimaad farsamo oo kale oo ay aqoonsatay waaxdu, iyo tallaabo kasta oo sixitaan ah oo loo oggolaaday sharciyada gobolkan. Sida ku cad OAR 581-075-0030, tallaabada sixitaanka waa in lagu dhammeeyaa waqti iyo hab ay ODE amartay.

## 19. Ka waran haddii dugsi dadweyne uu ku guuldareysto inuu buuxiyo amar ODE si loo saxo jebinta sharciga?

Sida ku cad OAR 581-075-0030, ODE waxay ka joojin kartaa dhammaan ama qayb ka mid ah qaybin kasta oo ka timaadda Sanduuqa Dugsiga Gobolka oo haddii kale loo qaybin lahaa dugsiga dadweynaha.

## 20. Maxay qabataa Qaybta 6 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)?

Sida ku cad Qaybta 6 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025), wax ka badelka ORS 337.260, guddiga dugsiga degmada ama guddi ama maamule mas'uul ka ah qaadashada agabyada waxbarashada asaasiga ah:

- Ma mamnuuci karo isticmaalka agabyada iyadoo lagu saleynayo in agabku ay ku jiraan aragti, daraasad ama sheeko, ama ay abuureen, qof ama koox ka tirsan nooc dad oo la ilaaliyo; iyo
- Ma diidi karo in la ansixiyo isticmaalka agabyada iyadoo lagu saleynayo in agabku ay ku jiraan aragti, daraasad ama sheeko, ama ay abuureen, qof ama koox ka tirsan nooc dad oo la ilaaliyo.

Agabyada waxbarashada asaasiga ah lagama saari karo isticmaalkiisa qof aan ahayn guddiga dugsiga degmada ama guddiga ama maamulaha mas'uulka ka ah qaadashada agabyada haddii aan:

- Codsi ayaa la sameeyay si looga saaro;
- Qofka codsiga sameynaya waa waalid ama mas'uul arday ama shaqaale;
- Codsigu waa mid rasmi ah oo qoran;
- Codsiga waxaa dib u eegaya guddi dib u eegis oo ka socda dugsiga dadweynaha ama degmo dugsiyeedka;
- Agabyadu waxay ku sii jiri karaan wareegga inta lagu jiro nidaamka dib u-eegista;
- Saaristu ma dhacayso sababtoo ah agabyada waxay ka kooban yihiin aragti, daraasad ama sheeko ku saabsan, ama ay abuureen, qof ama koox ka tirsan nooc astaan la ilaaliyo; iyo
- Guddiga dib u-eegista ayaa bixinaya sharraxaad qoraal ah oo caam ah oo loogu talagalay saarista.

## 21. Maxay qabataa Qaybta 7 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)?

Sida ku cad Qaybta 7 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025), wax ka badelka ORS 336.082(3) guddiga dugsiga degmada ama maamule ama qof kasta oo mas'uul ka ah horumarinta ama hirgelinta manhajka dugsiga dadweynaha:

- Ma mamnuuci karo isticmaalka agabyada barnaamijka iyadoo lagu saleynayo in agabku ay ku jiraan aragti, daraasad ama sheeko, ama ay abuureen, qof ama koox ka tirsan nooc dad oo la ilaaliyo; iyo
- Ma diidi karo in la ansixiyo isticmaalka agabyada barnaamijka iyadoo lagu saleynayo in agabku ay ku jiraan aragti, daraasad ama sheeko, ama ay abuureen, qof ama koox ka tirsan nooc dad oo la ilaaliyo.

## 22. Ka waran haddii guddiga dugsiga dugsiyada degmada ama qof kale uu ku xadgudbo Qaybta 6 ama 7 ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025)?

Habraacyada cabashada iyo rafcaanka ee khuseeya Qaybta 2 aad ee Xeerka Aqalka Sare 1098 (2025) ayaa sidoo kale khuseeya Qaybaha 6 iyo 7 (fiiri Su'aalaha Badanaa La Weydiiyo #14 - 16). Baaxada baaritaanka ODE waxay noqon ku saleysnaan doontaa in agabyada waxbarashada ee asaasiga ah ama agabyada barnaamijka la diiday ama laga saaray sababo la xariira inuu ka kooban yihiin macluumaad la xiriira nooc dad oo la ilaaliyo, ama sababo la xariira waxa uu qoray qof ka tirsan nooc dad oo la ilaaliyo.

## 23. Sharcigu ma ogol yahay iibsashada agabyada maktabadda, buugaagta waxbarashada, agabka waxbarashada, ama agabyada barnaamijka ee ujeeddooyin diimeed loo adeegsado?

Maya. Qaybta 5 aad ee Qodobka I ee Dastuurka Oregon waxay si gaar ah u mamnuucaysaa in lacagaha dawlada loo isticmaalo ujeeddooyin diimeed. "Lacag lagama soo saari karo Khasnada si looga faa'iideeyo hay'ad diimeed, ama mid diin, mana loo qoondeyn karo lacag lagu bixinayo adeegyo diimeed oo ka jira labada aqal ee Golaha Sharci-dejinta."

## 24. Sidee sharcigu u ilaaliyaa diinta si loo dhawro koox la ilaaliyo?

Haddii agabyada maktabadda, buugaagta waxbarashada, agabyada waxbarashada, ama agabka barnaamijyada ee ka kooban waxyaabo diin la xariira lagu iibsado, la doorto, la hayo, ama loo isticmaalo ujeeddooyin diimeed, markaa agabkaas lama diidi karo ama lama saari karo iyadoo lagu saleynayo in agabku uu ka kooban yahay waxyaabo diin la xariira.